



Maalin Dhulka 2021

Abriil 22, 2021

Maalinta Dhulka Wanaagsan! Annagoo aqoonsanayna caadadan sanadlaha ah, waxaanu jeclaan lahayn inaanu wakhti ku qaadano qiritaanka dhammaan shaqada cajiibka ah ee ardayda, shaqaalaha, iyo saaxiibadu ay ka qabanayaan degmada oo dhan si ay sare ugu qaadaan ballanqaadkayaga ku aaddan Caddaaladda Cimilada.

Manhajka

Dayrtii 2019, Dugsiyada Dadwaynaha Portland waxay shaqaaleeyeen Maareeyihii ugu horreeyey ee Barnaamijyada Isbaddalka Cimilada iyo Caddaaladda Cimilada si ay u fududeeyaan abuurista manhaj ay ku darayaan mawduucan muhiimka ah cutubyada lagu barto Sayniska iyo Cilmiga Bulshada K-12 (Barbaarinta ilaa Fasalka 12aad) oo xoogga lagu saarayo bulshooyinka ay dhibaatooyinka cimiladu inta ugu badan saamaysay. Ilaa hadda, lix dugsiyada sare ee PPS ah ayaa tijaabinaya koorsooyin ikhtiyaar ah oo caddaaladda cimilada ah oo qaybo badan ka kooban halkaasi oo ardaydu ay baaraan meelaha ay iska soo galaan sayniska cimilada, dhaqaalaha iyo caddaaladda bulshada, iyo u-dooditaanka.

Ka fiiri shaqada ardayda, [halkan!](#)

Hoggaanka Dhallinyarta

Golaha Talobixinta Cimilada ee Ardayda

Talobixinta Cimilada ee Dhallinyarta ee PPS ayaa la wadaa! Ujeedada kooxdan la-talineed waa soo jeedinta xalal halabuur leh oo ku aaddan sida degmada oo dhan looga arko isbaddalka cimilada iyo adeegsiga waayo-aragnimada ardayda ee dhanka ku hagitaanka degmada nidaam safka hore ah oo dhallinyarta shiishka saaraya oo ku saabsan arrinta cimilada. Himiladu waa ku dhiirgalinta ardayda PPS inay sameeyaan isbaddal iyadoo loo marayo siinta fursado ay tallaabo ku qaadi karaan ardaydu iyo hubinta in codka ardayda la maqlo, la matalo, oo la tixgaliyo. Caadi ahaan, Guddida Talobixintu waxay u kulmaan si bille ah waxayna fursad u haystaan inay talo ka siiyaan kormeeraha guud mustaqbalka caddaaladda cimilada gudaha PPS.

Barnaamijka Safiirada Cimilada

Kooxda Waaritaanka PPS waxay sidoo kale u bilaabeen barnaamij cusub sanadkan ardayda dugsiya sare ee danaynaysa shaqada caddaaladda cimilada ee bulshada. [Barnaamijka Safiirada Cimilada](#) wuxuu isku xiraa ardayda iyo hoggaamiyayaasha bulshada ee ururadoodu ka shaqeeyaan caddaaladda cimilada mandaqadda Portland-ta wayn. Ardaydu waxay awoodaan inay ka waraystaan abaabulayaasha xirfadlayaasha ah sida ay tahay ka shaqaynta caddaaladda cimilada ee la xiriira meelaha, sida ururkoodu u hoggaamiyo, caqabadaha soo food-saara, iyo fursadaha ay ka arkaan dhaqdhaqaaqa hore u socodka ah. Waa fursad ururadu ay ugu xirmi karaan dhallinyar xiisaha badan u qaba, iyo in ardaydu ku barbartaan xirfadaha waraysiga, kobcinta xirfadeed, oo xiriir la sameeyaan hoggaamiyayaasha bulshada. Waraysiyada waa la duubay waxaana loo adeegsaday agab waxbarasho ahaan fasalada caddaaladda cimilada ee mustaqbalka.

Hawlgallada

Sidoo kale wax muuqda ayaanu ka samaynay abuurista dhaqano hawlgal oo cimilada u fiican sanadkii hore. Halkan PPS, ka badan 85% kaarboonka aanu soosaarno wuxuu ka yimaaddaa

isticmaalka gaaska iyo korontada ee dhismayaasha. Annagoo saadaalinayna baaxadda Curaarta 2020, waxaanu hirgalinay heerar Tamarta & Waaritaanka ah marka la eego dhammaan nashqadaha iyo shaqada dhismaha ee dhismayaasha cusub. Heerarkani waxay xaqiijin jilka xiga ee dugsiyada PPS inay baradhaafiyaan shuruudaha dhismaha ee la xiriira tashiilidda khayraadka, caafimaadka qofka, iyo tayada bii'eed ee gudaha dhismayaasha. Dhammaan dhismayaashayada cusub waxay u diyaarin ardayda mustaqbal iyadoo siinaya waxbarasho tayadeedu sarrayso oo ku taala bii'ad u qaabaysan oo taageeraysa nuxurka iyo dhaqanada waaritaanka.

Maaddaama dhismayaasha PPS oo dhan aan halmar la wada dhisin, PPS sidoo kale waxay qaadday tallaabooyin si ay u horumariso waaritaanka iyo tashiilidda tamarta dhismayaasha jira. 36 dhisme, oo leh dugsiyada Title I oo qaadanaya mudnaanta koowaad, ayaa loo rogay iftiinka wada-LED ka ah. Sidoo kale, baska dugsiya ee korontada ku shaqeeya kii ugu horreeyey ee degmadu yeelato ayaa hawlgali doona sanadka dambe waxaana ku mahadsan maalgalinta deeqda Portland General Electric (PGE).

Degmadu sidoo kale waxay qaadaysaa tallaabooyin ay ku bilaabayso qaab aad u nidaamsan oo loo siman yahay oo ay ku rakibayso barxado dugsi oo cagaaran, halkaasi oo ardayda iyo macallimiintu ay ku kulmi karaan, ciyaari karaan, waxna kaga baran karaan cimilada iyo waaritaanka. Iyo iyadoo kaashanaysa mid kamid ah saaxiidayada bulshada ee cajiibka ah, [DePave](#), PPS waxay u rogtay boqolaal fuudh oo laba jibbaaran oo daamur iyo shub ah barxad doogga, beero ah, iyo biyo qulqulaya ah oo cagaaran 20 dugsi iyo tirinta gudaha sanadkii hore.

Nafaqada

Adeegyada Nafaqadu wali waxay sii wadaan inay hoggaamiyaan dadaalada lagu xaqiijinayo in cuntadu ay noqoto mid ardayda oo dhan ay heli karaan, haddii ay ugu soo laabtaan ama ayna ugu soo laaban dugsiya waxbarista isku dhafka fool-ka-foolka ama haddii ay ku sii jiraan waxbarashada onlaynka ah. Kooxaha Adeegyada Nafaqadu waxay ka gudbeen abuuridda nidaam cusub gabi ahaan oo waxsoosaar, qaybin, iyo gaarsiin si ay u siiyaan ka badan 800,000 oo cunto ardayda iyo qoysaska u baahan ilaa Sibtambar.

Si ay u kordhiyaan cuntada ay ardaydu heli karaan una isticmaalaan dhulka dugsiya, Adeegyada Nafaqadu waxay wada shaqayn la bilaabeen [Grow Portland](#) si ay u qaybiyaan wixii kasoo go'a beeraha dugsiyada. Grow Portland waxay soo ururisay ka badan 2,500 oo rodol oo cunto ah, laga bilaabo Maarso ilaa Noofambar 2020, taasi oo dib loogu sii qaybiyey ardayda iyo qoysaska u baahan. Sanadkan, Grow Portland waxay beertay oo goy'say ka badan 40 nooc oo kala duwan oo dalag ah, abuurta xaashiyo hawleed, oo siisay cuntooyin carruurta ku habboon oo ku jira kiishashka cuntada lagu qaybiyo. Bishii Maajo, waxay bilaabi goosashada dalagga 2021. Grown Portland waxay shiishka saartaa soosaaridda cuntooyin kala duwan oo ay beer kasta ka beerto si marka ardaydu ula wadaagto cuntada lodkooda taasi oo muujinaysa dhaqamada iyo bulshooyinka ay matalayaan inta lagu jiro aafada cudurka iyo kadib.

Iyadoo shaqaalaha Adeegyada nafaqadu ay u guurayaan doorar taageero oo waxbarista fool ka foolka ah, isku-dhafka ah, kooxahoogu waxay isticmaalayaan barnaamij ururinta hambada cuntada oo dugsi kasta madbakhiiisa ka qabsooma degmada oo dhan. Diyaarinta cuntada ee PPS waa mid aad u tashiilin badan, hase yeeshee, iyadoo og in cuntada la daadiyo ee qashinka lagu daro ay qayb ka tahay isbaddalka cimilada, kooxaha Adeegyada Nafaqadu waxay samaynayaan dadaal ay uga ilaalinayaan wixii cunto hambo ah in qashinka lagu daro.

Wakhtigan, hambada cuntada waxa ururiya maamulka Magaalada waxayna u rogaan qoosh iyagoo isticmaalaya xarumo ku dhaw Salem iyo Corvallis. Maamulka Magaaladu waxay sii wadi inay ka shaqeeyaan xarumo ku dhaw mandaqadda Portland-ta wayn oo u rogi kara hambada cuntada waxsoosaar faa'ido leh.

Macluumaadka Waaritaanka PPS:

[Linkiga bogga websaytka ee 'Kaqaybqaado!'](#); waxaad ka heli khayraad, fursadaha ardayga iyo shaqaalaha, iwm.

pps.net/sustainability

Instagram: @pps_sustainability